

Qoysaska dhaqan ahaan iyo luuqad ahaan kala jaadka (CALD)



Qoysaska Australia waxay sii noqonayaan kuwa aad u kala jaadjaad ah. Kala duwanaanshaha ku salaysan noocyada wuxuu keenaya loolan cusub iyo abaalmarin cusub. Mid ka mid ah loolanada waa in la hello dariiqooyin macne u samaynaya qoysaska ka soo jeeda CALD si ay lug ugu yeeshaan una kaalmeeyaan deegaanka ilmahooda, waana in doorkooda la qiimeeyaa. Abaalmarinada lagu hello shaqo ixtiraam leh oo laga wada qaybgelayo, ee qoysaska CALD waa wax qadarin mudan.

- Cilmi baaris ayaa muujinaysa saamaynta wax ku oolka ah ee xiriirka iskaashi oo u dhexeeya Daryeellayaasha iyo qoysaska, iyadoo aan ku xirnayn qofka halka uu ka soo jeedo (Mitchell, 2003)
- Carruurta waxay dareemaan kalsooni iyo is-qadarin markay dareemaan in iyaga iyo waalidkood la qiimeeyey lana ixtiraamay
- Weliba, ka faaiidaysiga kala duwanaanshaha carruurta
- Qoysaska CALD waxay la wadagaan dabeecada badan dadka kale, laakiin waxaa jira dhibaatooyin siyaado ah iyo welwelo ay u badan tahay in qoysaskaasi la kulmaan.

Horumarka carruurta waxaa kobciya marka qoysaskooda la taageero, dhaqankooda la ixtiraamo ayna jirto isbedel la'aan u dhexaysa noloshu carruurta (Mitchell, 2003).

Australia waxaa camiray dad dhaqan ahaan kala duwan taas oo kala duwanaantu ay door ka qaadato hanaanka iyo horumarka ummadda. Si loo kaalmeeyo qoysaska CALD, daryeellayaasha waxay caawimi karaan dhisida bulsho isjecel oo dulqaad leh taasi oo qiimaysa kala-duwanaanta.

Baahida ugu muhiimsan oo dhamaan carruurta waa in dadka waaweyn oo ku wareegsan iyaga ay la socdaan La socodkaas iyo qiimayntu muhiim ayay u tahay horumarka muuqaal caafimaad qaba. (Barrera iyo Corso, 2003:12).

Qoysasku badanaa waa kuwa ugu weyn oo bixiya la socod wax ku oolla, laakiin carruurta waxay kaloo u baahan yihiin inay dareemaan in la ictiraafdo laguna qiimeeyo marka dad aan xubnaha qoyskooda ahayni ay siinayaan daryeel. Sida qoysaska kale oo dhan, qoysaska CALD waa inay awoodaan filida in deegaanka iyo barnaamijku u ogolaanayo iyaga iyo carruurtooda soo dhowayn iyo ixtiraam. Dariiqooyinka daryeellayaashu kaga dhigi karaan qoysaska CALD inay dareemaan soo dhowayn, qoysaskuna la wadaagi karaan xirfadooda, aqoontooda iyo faaiidooyinka dhaqankooda waxaa ka mid ah:

- Muujinta fariimaha salaamaha luqadaha kala duwan ku qoran, kuwaas oo ay ku jiraan luqadaha carruurta la daryeelayo
- Isticmaalida buugaag, gaymam iyo muyusig ka tarjumaya dhaqamada kala duwan oo ay ku jiraan dhaqamada caruurta la daryeello
- Casumida waalidiinta iyo xubnaha kale ee qoyska si ay u bixiyaan xirfadahooda gaarka ah iyo waxay xiiseeyaan
- Ku dhiiri gelinta carruurta inay keenaan alaabada dhaqan ahaan muhiimka u ah si ay u tusaan uganala hadlaan kuwa kale
- Bixinta iyo la wadaagida cuntada kuwa dhaqamada kala duwan, kuwaas oo ay ku jiraan kuwa deegaanka daryeelida
- Cuntooyinka la xiriira dhaqan iyo waxa-reeban dhaqan ahaan waa in la fahmaa lanaa ixtiraamaa.

Dhaqankaan la wadaagayo waa in uu noqdaa mid ah ay helli karaan kana qayb qaadan karaan qoysaska asalkoodu aanu ka tirsanayn dadka dhaqamda kala duwan.

Weliba qoysaska CALD waxay leeyihiin dabeecado. Ictiraafida iyo wax ka qabashada dhaqamada kala duwan ee qoysaska CALD maaha in lagu bedelo aqoonsiga iyo qiimaynta dabeecada iyo tayada shakhsiga.

Xaashidaan xaqiiqada ee waalidka waxaa la hellaa iyagoo ku qoran luqadaha bulshooyin ee kala duwan waxaana lagala soo bixi karaa websaytka loo yaqaan *Early Childhood Connections* www.ecconnections.com.au

Da'daal

Waxaa taageeray